GIG CYMRU NHS WALES
Iechyd Cyhoeddus Cymru
Public Health Wales

Skaanka dhawaaqa dheer ee uurka

Ayadoo qayb ka ah xannaanadaada dhalashada ka hor, waxaa lagugu sameyn doonaa 2 skaan dhawaaq dheer (ultrasound scan). Adiga ayaa xulan karo haddii aad rabtid iyo inkale in baaritaanyadaan lagugu sameeyo. Fadlan akhri buug-yarahaan ka hor intii aadan go'aankaan gaarin.

Buug-yarahaan waxaa loogu talagalay haweenada uurka leh wuxuuna kuu macneyn doonaa:

- Waxa ay baaritaanyada yihiin;
- Sababta loo sameeyo; iyo
- goorta la sameeyo.

Skaanka waa hab lagu baaro dhibaatooyinka suurtogalka ah ee uurkaaga ku dhici karo. Waa tijaabo baaris. Kani waxaa loola jeedaa in lagu ogaan karo dhibaatoyin oo ka dib u baahnaan karo in baaritaanyo kale lagu xaqiijiyo. Skaanka dhibaato walba laguma ogaan karo.

Waa maxay skaanka dhawaaqa dheer?

Makiinada dhawaaqa dheer wuxuu isticmaalaa hiirarka dhawaaqa si ay sawir uga soo saaraan shaashada kombyuutarka.

Qofka skaanka sameeyo waxaa lagu magacaaba sonographer. Sonographer'ka wuxuu kuu macneyn doonaa skaanka markii aad ballankaaga joogtid.

Sidee loo qaban-qaabiyaa skaanka?

Haddii aad go'aansato in lagugu sameyo skaan, umulisadaada ayaa kuu sheegi doonto meesha lagu qaban doono iyo ballan kuu qaban-qaabin doonto.

Haddii ballan laguu sameeyey iyo go'aansato inaadan rabin skaan, fadlan u sheeg umulisadaada sidii ay ballanka u tirtirto.

Sidee loo sameeyaa skaanka?

Sonographer'ka wuxuu arki karaa sawir ka fiican ee ilmahaada haddii kaadi-galeenkaaga uusan faruuq eheen markii skaanka lagugu sameynaayo. Fadlan isku day inaadan kaadinin ilaa hal saac ka hor ballankaaga.

Sidii uu sonographer'ka si cad u eego ilmahaada, skaanka waxaa lagu sameeyaa qol iftiin yar leh. Skaanka wuxuu u baahan yahay in xoog-saaris badan lagu sameeyo sidaas awgeed qolka skaanka waa mid aamusnaan leh. Sonographer'ka ayaa kuu macneyn doono waxay sameynayaan iyo waxay raadinaayaan.

Information for Women

© Public Health Wales

Waxaa lagaa codsan doonaa inaad dhabarka uu jiifsato si skaanka loo sameeyo. Ma u baahnid inaad dhar gaar ah ugu labisato skaanka. Hase-yeeshee, waxaa lagaa codsan doonaa inaad kor u qaado qaybta kore ee dharkaaga ilaa xabadka iyo hoos u dhigto goonnadaada ama surwaalkaaga ilaa misigtaada. Markaa maaddo jil-jilacsan (gel) ayaa caloshaada la marin doonaa si qalab lagu magacaabo transducer loo maarsiiyo calooshaada. Hiirarka dhawaaqa dheer ma mari karaan hawada sidaas awgeed maaddada jil-jilacsan wuxuu hubin doonaa in maqaarka calooshaada iyo transducer'ka si fiican isku taabanaayaan. Dharkaaga waxaa lagu badbaadinaaya warqado si uu maaddaada jil-jilacsan u gaarin.

Transducer'ka wuxuu calooshaada marsiiyaa hiirarka dhawaaqa ilaa uu ka gaaro ilmo-galeenka. Hiiraarka dhawaaqa markaas dib ayeey u soo laabanaayaan markii ay cunugga gaaraan kaaso sawir noqonaayo iyo waxaa sawirkaas lagu arki karaa shaashada kombyutarka.

Skaanka dhawaqa dheer waa mid fudud iyo xannuun la'aan ah. Sonographer'ka wuxuu qalabka ku riixi doonaa calooshaada si uu si fiican ilmahaada u arko.

Skaanka miyuu nabad yahay?

Sida aan og nahay, skaanka taariikh ogaanka uurka iyo skaanka cillaad-raadinta ilmaha waxay nabad u yihiin cunugga iyo hooyada.

Waa maxay faa'iidoyinka sameynta skaanka la qabto waqtiga hore ee uurka iyo midda cillad-raadinta ilmaha?

Skaanka la qabto waqtiga hore ee uurka wuxuu xaqiijiyaa in ilmahaada wadnihiisa shaqeeyo iyo imisa toddobaad uur ah aad qabtid. Skaanka waxaa xittaa lagu eegi doonaa haddii caloosha ay ku jiraan hal ilmo ama ka badan si ay umulisadaada iyo takhtarkaaga sii fiican kula qorsheeyaan xannaanadaada.

Skaanka waxaa lagu ogaan doonaa dhibaatoyin ka hor intii uu cunugga dhalanin. Ogaashada inuu dhib jiro ka hor intii uu cunugga dhalanin wuxuu caawin karaa adiga iyo lammaanahaada inaad is-diyaarisaan. Marmar wuxuu kugu caawin karaa qorsheynta daaweynta cunugga markuu u dhashto ka dib. Marmar markii ay haweenada ogaadaan inuu jiro dhib aad u wayn, waxay tixgelin karaan inay uurka joojiyaan.

Waa maxay faa'iido-darrada sameynta skaanka dhawaaqa dheer ee waqtiga horey ee uurka iyo skaanka cillad-raadinta ilmaha?

Sameynta skaanka wuxuu kugu kicin karaa wel-wel gaar ahaan haddii dhibaato la helo. Haddii aad jeceshahay inaadan ogaanin dhibaatoyinka uu ilmahaada qabo dhalashada ka hor, waxaad u baahan tahay in si taxadar ah uga fikirto haddii aad skaan sameyso iyo inkale. Waa inaad wel-weladaada kala hadashaa umulisadaada.

Information for Women

© Public Health Wales

Natiijoyinka

Natiijadeyda baaritaanka miyuu ahaan doonaa mid qarsoodi (sir) ah?

NHS'ta waxay natiijoyinka dhammaan baaritaanyada ku hayaan si qarsoodi ah. Siyaasadda isbitaalka ee ku saabsan inta qofood ee arki karo natiijoyinka baaritaanyadaada wuu kala duwan yahay. Umulisadaada ayaa kuu macneyn doonto hab-socodyada deegaankaaga.

Sidee u heli doonaa natiijada skaankeyga?

Sonographer'ka ayaa kuu sheegi doono natiijada skaankaaga markii baaritaanka la dhameeyo.

Miyaan qoyskeyga iyo saaxibadeyda keeni karaa markii skaanka laygu sameynaayo?

Ilmaha badankooda waa kuwo caafimaad-qab ah, laakin inkasto skaanka cillad-ogaanka muujin karo cilladaha dhici kara, waxaa fiican inaad lammaanahaada ama qof kale ee ku taageero inuu ku soo raaco markii skaanka lagugu sameynaayo.
Waxaa fiican in carruur ku soo raacin ballanka. Waxay weecin karaan adiga iyo sonographer'ka markii skaanka la sameynaayo.

Miyaan heli karaa sawirka ilmaha?

Mar mar waxaa suurtogal ah in la iibsado sawirka skaanka laga sameeyey ilmahaada. Fadlan u sheeg sonographer'ka haddii aad rabtid sawirka ka hor intii skaanka lagugu bilaabin.

Skaanka dhawaaqa dheer ee waqtiga horey ee uurka

Skaankaan waxaa lagu sameeyaa dhammaan haweenada markii ay garaan 11 ilaa 13 toddobaad uur ah.

Imisa waqti ayuu ku qaadan doonaa sameynta skaankaan?

Skaanka dhawaaqa dheer ee waqtiga horey ee uurka wuxuu ku qaataa 10 daqiiqo.

Skaanka waxaa loo qabtaa si:

- loo baaro garaaca wadanaha ilmahaada;
- lagu ogaado haddii hal ilmo ka badan ku jiro uurka (haweenada qaba mataano ama seddax ilmo waxay u baahan yihiin xannaano dhalidda ka hore ee dheeraad ah, markii ay mataano qabaan waxaa muhiim ah in la ogaado haddii ilmaha kala qaybsadaan mandheerta);

loo cabbiro ilmahaada, si loo eego imisa toddobaad uur ah aad tahay iyo taariikhda la filaayo inaad dhasho (kani wuxuu gaar ahaan muhiim u yahay haddii aad ku talajirto in tijaabo baaris dheeraad ah lagugu sameeyo); iyo

- loo eego horumarka ilmahaada (horumarka ilmaha waqtigaan aad cad uma ahan, laakin mar-mar dhibaato xun ayaa la ogaan karaa).

Information for Women

© Public Health Wales

Miyaan u baahan doonaa skaan kale ee waqtiga horey ee uurka?

Mar-mar ilmaha si cad looma arki karo markii la isticmaalaayo qalabka transducer, sidaas awgeed sonographer'ka wuxuu kugu talin karaa in lagugu sameeyo skaanka jirka gudihiisa ah. Kani waxaa lagu magacaaba skaanka transvaginal, wuxuuna bixin karaa sawir ka cad midka caloosha. Waxaa lagaa codsan doonaa inaad firaaqo ka dhigto kaadi-galeenkaaga skaankaan ka hor. Qalab yar ayaa markaa la gelin doonaa siilkaaga, sida suufka caadada.

Skaanka dhawaaqa dheer ee siilka xanuun ma lahan. Sonographer'ka ayaa kuu macneyn doono skaanka iyo fasax kaa codsan doono in lagugu sameeyo. Haddii aadan rabin in lagugu sameeyo skaanka jirka gudihiisa, fadlan u sheeg sonographer. Waxaa laguu sameyn doonaa ballan kale ee lagugu sameyo skaanka caloosha.

Skaanka dhawaaqa dheer ee cillad-raadinta ilmaha

Skaankaan waxaa la qabtaa markii uurka gaaro 18 ilaa 20 toddobaad.

Imisa waqti ayuu ku qaadan doonaa sameynta skaankaan?

Skaanka wuxuu caadi ahaan ku qaadan doonaa 15 ilaa 20 daqiiqo.

Skaanka waxaa loo qabtaa si:

- loo baaro horumarka jireed ee ilmahaada;
- lagu ogaado dhibaato (oo xittaa lagu yaqaano cillado) sida fajaha dhabarka iyo cillado kale ee tubada furan ee neural;
- loo eego tirada dareerka ilmo-galeenka ee ku heeraran ilmaha; iyo
- loo eego meesha ay mandheerta taalo.

Sonographer'ka wuxuu qabaa liiska waxyaabaha uu ka eegi doono ilmahaada iyo wuxuu xittaa qaadi doonaa cabbiro.

Miyaan u baahan doonaa ina laygu sameeyo skaan kel ee cillad-raadinta ilmaha?

Sonographer'ka wuxuu isticmaali doonaa liis baaritaan horey loo go'aansadey si u u eego xaalado gaar sida fajaha dhabarka. Sonographer'ka waxaa suurtogal ah inuusan awoodin inuu wax walba ee ku qoran liiska uu eego. Mar-mar suurtogal ma ahan in la eego wax walba ee ku yaalo liiska markii skaanka la qabaanayo. Kani wuxuu dhacaa markii:

- ilmahaada u jiifo gees oo baaritaanka dhib ka dhigaayo;
- skaanka la sameeyey waqti aad u horey ee uurkaaga; iyo
- culayskaaga ka sarreyo midka caadiga ah kaaso dhib ka dhigaayo in si cad loo arko ilmahaada.
-

Haddii uu kani dhaco, waxaa lagu siin doonaa ballan kale si aad u soo laabatid iyo lagugu sameeyo hal skaan ama ka badan si loo eego haddii sonographer'ka dhammeyo baaritaanyada ku qoran liiska. Mar walba suurtogal ma ahan in ballanka labaad sonographer'ka ku dhammeystiro liiska.

Information for Women
© Public Health Wales

Dhibaatooyinkee ayuu skaanka heli karaa?

Skaanka wuxuu muujin karaa dhibaatoyinka horumarka ilmaha, laakin dhamman laguma ogaan karo. Qaar ka mid ah dhibaatoyinka ilmahaada waxay dhici karaan 20 toddobaad ka dib qaar kalena laguma ogaan karo skaanka dhawaaqa dheer. Kani waa sababta ay dhowr xaalado, ilmaha ku dhashtaan dhibaatoyin inkastoo dhibaatadaas lagu ogaanin skaanka dhawaaqa dheer.

Bogga 5 waxaa ku yaalo liiska dhibaatooyinka ugu caansan ee lagu arki karo skaanka. Tiirka midigta wuxuu muujin doonaa suurtogalnimada in skaanka dhawaaqa dheer ee cillad-raadinta ilmaha lagu ogaado dhibaatada haddii uu ilmahaada xaaladdaas qabo. Liiskaan kuma jiro dhammaan cilladaha ee la ogaan karo.

Dhibaatada	**Fursada in dhibaatada lagu ogaado skaanka dhawaaqa dheer ee cillad-raadinta ilmaha markii la yahay 18 ilaa 20 toddobaad ee uur ah**
Cillada tuubada neural waxaa sababo markii maqaarka ama lafta daboolo xangullaha ama maskaxda si fiican uu sameysmin. Labada cillado ee tuubada neural ee ugu wayn waa: **Anencephaly** (qaybta kore ee madaxa oo maqan) **Spina bifida** (fajaha dhabarka) (maqaar ama lafo oo daboolin xangullaha)	 **99%** **90%**
Dhibaato wayn ee wadne	**25%**
Diaphragmatic hernia (cilladda muruqa kala qaybiyo xabadka iyo caloosha)	**60%**

Laga soo saarey: www.rcog.org.uk (la galey 16/12/09)

Dhowr dhibaato ee ilmaha waxaa sabab u ahaan karo dhibaatoyinka koromosoomka kaaso saamayn ku yeelan doono habka uu ilmaha u koro. Haddii dhibaatada koromosoomka laga shakisan yahay, waxaa lagu siin karaa baaritaanka amniocentesis. Waxaad macluumaad ku saabsan baaritaankaan ka heli kartaa buug-yare kale.

Xaalado kale ee aad dhif u ah waxaa lagu ogaan karaa skaanka cillad-raadinta ilmaha, sida dhibaatoyinka kellida iyo addinada. Xaalado qarkooda laguma ogaan karo skaankaan, sida dhibaatoyinka yar ee habka u cunugga u koro, dhibaatoyinka dhaco skaanka ka dib, iyo xaaladaha sida cerebral palsy iyo autism.

Maxaa dhacaayo haddii dhibaato la ogaado, ama laga shakisan yahay, intii skaanka la qabanaayo?

Haddii uu sonographer'ka helo dhibaato, way kuu sheegi doonaan, waxaana awoodi doontaa inaad la hadasho umulisada ama takhtaatiirta kilinikadaada dhalida ka hor.

Information for Women
© Public Health Wales

Dhibaatooyin yar waxay u baahan doonaan skaan dheeraad ah marxalada dambe ee uurkaaga.

Mar-mar suurtogal ma ahan, markii skaanka cillad-raadinta koowaad la sameeyo, in sonographer'ka si xaqiiq ah ku sheego wuxuu dhibaatada yahay. Waxaa lagu siin karaa skaan kale, laguu diri karaa qayb kale ee isbitaalka ama qof ku takhasuusan nooca dhibaatada laga shakisan yahay inuu ilmahaada qabo.

Tijaaboyinka cudur-aqoonsiga ee la sameeyo skaan faah-faahsan ka dib

Waxaa suurtogal ah in lagu siiyo baaritaan kale, sida baaritaanka amniocentesis. Takhtarka isbitaalka ama umulisadaada ayaa ku siin doonto macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan baaritaanyada kale.

Maxaa dhici doono haddii la xaqiijiyo in cillad la helay?

Ogaashada dhalidda ka hor in ilmahaada dhibaato qabo wuxuu adiga iyo lammaanahaada idin ahaan karaa wax caawinaad ah. Macluumaad ku saabsan nooca dhibaatada waxaa loo isticmaali karaa si laysku diyaariyo goobta, sida iyo habka ilmahaada loo dhaliyo. Ilmahaada wuxuu u baahan karaa in lagu dhaliyo isbitaal kale oo leh shaqaale takhasuusan iyo xannaanada ilmahaada u baahan karo.

Tiro aad u yar ee dhibaato waa la daaweyn karaa ka hor intii uu ilmaha dhalanin.

Haddii dhibaatada aad u xun yahay, waxaad go'aansan kartaa inaad joojiso uurkaaga, ama waxaad go'aansan kartaa inaad uurkaaga sii wado. Kuwaani waa go'aano dhib ah waxaana lagu siin doonaa waqti, macluumaad iyo taageerid si lagugu caawiyo sameynta go'aanka adiga sax kuu ah.

Ogaashada in ilmahaada uurka ku jiro uu qabo dhibaato waa wax saxariir leh iyo go'aan ka gaarka waxa aad sameyn doonto waa dhib. Badanaa haweenada waxay rabaan iyo u baahan yihiin taageerid. Kani waxaa ku siin karo lammaanahaada, qoyskaaga ama saxiibo ama xirfadlayaasha caafimaadka ee ku xannaaneeyo. Haddii aad rabtid, lammanahaada, ama saxiibkaaga ayaa ballamada isbitaalka kuu soo raaci karo.

Macluumaad dheeraad ah

Waxaad umulisadaada, takhatarkaaga isbitaalka iyo sonographer'kaaga iyo bogga internetka Antenatal Screening Wales oo ah www.antenatalscreening.org ka heli kartaa macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan skaanka dhawaaqa dheer.

© Xuquuqda Daabacadda 2010. Ururka NHS ee Caafimaadka Shacbiga Wales. Dhammaan xuquuqyada u xiran. Lama ogola in gebi ahaan ama qayb ahaan nuqul laga sameysto ayadoo fasax laga helin milkiilaha xuquuqda daabacadda.
www.antenatalscreening.org
Abriil 2010
US Daabacadda 9aad

Information for Women
© Public Health Wales